




CAFIMAADKA GALMADA

Macluumaadka buuga yar ee ay soo saartay
Kaniisada City Mission

**KIRKENS
BYMISJON**





CILMIGA KU
SAABSAN
CAAFIMAADKA
GALMADA

...waxay difaaci kartaa adiga
iyo kuwa kaleba.

...waxay kaa caawin kartaa
inaad hesho nolol wanaagsan.

...waxay ka hortagi kartaa
cudurada caabuqa si aad
adigu u caafimaad qabto.

CAAFIMAADKA
GALMADA EE
WANAAGSAN
WAA



...dareenka wanaagsan ee ku saabsan galmadaada – jir ahaan iyo maskax ahaanba.



...caafimaad qabka iyo/ ama helida daryeelka caafimaadka ee munaasibka ah haddii aad jirooto.



...xuquuqda aad ku go'aansan karto jirkaaga iyo inaan lagu takoorin iyada oo la eegayo jinsigaaga, wadanka aad ka soo jeedo ama qofka aad jaceyl u qaado.



...xuquuqda aad ku go'aansan karto goorta iyo haddii aad rabto inaad galmooto.



...xuquuqda aad ku go'aansan karto nooca ka hortaga uurka laga yaabo inaad isticmaasho.



...xuquuqda aad ku go'aansan karto marka aad rabto inaad carruur yeelato.



ADEEGYADA
CAAFIMAADKA
GALMADA EE
NORWAY



Qof kastaaba wuxuu xaq u leeyahay daryeelka caafimaadka ee cudurada faafa ee Norway.



Dhamaan daaweeynta cudurada la iskugu gudbiyo galmada waa bilaash Norway.



Shaqaalaha daryeelka caafimaadka ee Norway waxay leeyihiin waajibka adag ee ilaalinta sirta.



Shaqaalaha daryeelka caafimaadku uma sheegi karaan qoyska, asxaabta ama kuwa kale waxa aad ka hadasho.



Adeega caafimaadka ee Norway wuxuu shaqaaleysiiyaa shaqaale aqoon sare leh wuxuuna ku saleysan cilmi baaris.

CAABUQYADA LA ISUGU GUDBIYO GALMADA (STIs)

- 💧 STIs waa cuduro la isugu gudbiyo xiriirka galmada.
- 💧 STIs waxay ku faaftaa tabashada u dhaxeysa maqaarka iyo xuubaha dheecaanka ee kujira farjiyada, afka iyo duburka
- 💧 Qaar ka mid ah STIs waxay ku faafi karaan dhiiga.
- 💧 Waa lagaa dawayn karaa ama waad la nolaan kartaa badi cuduradan ilaa iyo inta aad qadanyso daawada.
- 💧 Haddiii aad qaado STI, waa muhiim inaad la hadasho shaqaalaha daryeelka caafimaadka si aad u hesho daawo iyo caawimo.

SIDEE AYAAD ISAGA ILAALIN KARTAA INAAD QAADO STIs?



Adigoo isticmaalaya
cinjir (kondhom)
marka aad
galmooneyso.



Adigoo isbaaraya.
Waa fikrad wanaagsan
inaad si joogto
ahhaddii aad dhowr
qof la galmooto.



Waxaad qaadan kartaa
tallaalka qaar ka mid
ah cudurada si aanad
ku qaadin (cuduradaas).

HALKEE AYAAD ISKA BAARI KARTAA?



Xafiiska dhakhtarkaaga



Kaniisada City Mission waxay adeegeeda baarista ee gaarka ah ku leedahay
dhowr magaalo oo ka mid ah Norway. Badankoodu kaliya waxaa bixiyaan baarista
degdega ah ee HIV, halka qaarkale laga yaabo inay bixiyaan baaritaano kale.
Wixii (macluumaad) dheeraad ah ka akhri www.minuttest.no



Xarunta caafimaadka ee degmada aad ku nooshahay.




Rugaha caafimaadka ee lacag la'aanta ah, halkan ka firiiri liiska
www.helsenorge.no

HIV

- ⊕ HIV waa fayris lagu kala qaadi karo galmada iyo dhiiga.
- ⊕ Qof kastaaba wuu qaadi karaa HIV, iyada oo aan loo eegaynin jinsiyada, wadanka uu ka soo jeedo ama qofka uu la galmooday.
- ⊕ Daawo la'aan, HIV wuxuu kaa dhigi karaa mid xanuunsanaya waadna u dhiman kartaa.
- ⊕ Daawo marka la helo, waxaad wakhti dheer la noolaan kartaa HIV, mana u dhiman doontid cudurka.
- ⊕ Halkan Norway, dhamaan kuwa qaba cudurka-HIV waxay helaan daawo.
- ⊕ Haddii aad tahay magangelyo doon, xaaladaada HIV ma saameyn doontto codsigaaga.
- ⊕ HIV iyo AIDS ma ahan isku mid. HIV waa fayris aad la noolaan karto,, halka AIDS uu yahay xaalad ku dhacda dadka qaba-HIV-ga marka ayna qaada daawo.

HIV WAXAA LA ISUGU GUDBIN KARAA



...haddii aad
yeelato galmo aan
dhowrsanayn.



...haddii aad la
wadaagto irbadaha dad
kale.



...hooyada ayaa u
gudbin karta ilmaheeda
wakhtiga uurka, dhalmada
iyo naas-nuujinta.



...dhiig ku shubida
wadamada qaar
(maaha Norway)

HIV LA ISUGUMA GUDBIYO



... candhuuf,
dhidid, ilin iyo
kaadi



...dhunkasho, laab
gelin, qabsasho,
salaaxida iyo
taabashada jireed.



...taabashada
saaxiibtinimada ah
ee dariska, asxaabta,
qoyska iyo kuwa
kale.



...cuntada, cabitaanka
iyo wadaagista musqusha
iyo qubeyska.

KUWA QABA-HIV EE SI GUUL LEH LOO DAWEEYAY:



Ma qaadiin
karaan kuwa kale.



Waxay noolaan karaan
nolol dheer oo u
wanaagsan sida kuwa
aan qabanin HIV.



Waxay dhali
karaan cunug
iyaga oo aan
qaadsiinin
cunuga.



Waxay yeelan
karaan qoys,
asaxaab iyo
jaceyl.



Way galmoon
karaan iyaga oo
aan qaadsiinin
lamaanhooda
galmada.

WAXAAD WAXBADAN KA OGAAN KARTAA HALKAN:

KANIISADA CITY MISSION

Aksept waa xarun bixisa hagida iyo taageerada dhamaan kuwa qaba HIV, oo ujeedadeedu tahay kordhinta awoodsiinta-shaqsiga ah iyo madaxbanaanida. Aksept sidoo kale waa xarunta kheyraadka dhamaan dadka raba inay wax badan ka ogaadaan HIV iyo sida ay u saameyso nolosha dadka. www.aksept.org

Kaniisada City Mission wuxuu leehay dhowr urur oo ka shaqeeya caafimaadka galmada. Wax badan ka akhri www.minuttest.no

HELSENGE.NO

Helsenorge.no waa barta internetka caafimaadka ee dadweynaha degan Norway. Helsenorge.no wuxuu leeyahay bogga macluumaadka ku saabsan galmada caafimaadka halkaas oo aad akhrisan karto dhamaan mawduucyada la xiriira oo aad ka heli karto liiska goobaha aad ka heli karto caawimo. www.helsenorge.no

HIVNORWAY

HivNorway waa hay'ad qaran oo siyaasad ahaan iyo diin ahaan ka madax banaan oo loogu talagalay dadka qaba

HIV, qoysaskooda iyo kuwa kale waxyeeloobay ama daneynaya wax ku saabsan HIV. Bartooda internetka www.hivnorge.no waxaa ku jira macluumaad badan oo ku saabsan HIV.

MACHADKA CAAFIMAADKA DADWEYNAHA EE REER NORWAY (FOLKEHELSEINSTITUTTET)

Hawsha Machadka Caafimaadka Dadweynaha ee Reer Norway shaqada waa inay soo saaraan, soo koobaan iyo faafiyaan aqoonta si loo kordhiyo caafimaadka wanaagsan, daryeelka caafimaadka wanaagsan iyo difaaca sharciga. Waxa bartooda internetka www.fhi.no ku qoran macluumaad si fiican oo xirfadnimo leh loo cusbooneysiiday kaas oo ku saabsan cudurada la isugu gudbiyo galmada.

SEX OG SAMFUNN

Sex ogsamfunn waa xarunta ugu weyn ee wadanka ee loogu talagalay galmada iyo caafimaadka taranka iyo xuquuqaha. Waxay siisa caafimaad lacag la'aan ah qof walba oo ka yar da'da 25 sanno waxayna leedahay macluumaad ku saabsan galmada oo ku qoran bartooda internetka. www.sexogsamfunn.no

OLAFIAKLINIKKEN

Rug lacag la'aan ah oo ay bixiso Isbitaalka Jaamacada Oslo taas oo baarta, daaweysa iyo dabagasha caabuqyada la isugu gudbiyo galmada. Waxay leeyihiin adeegyada booqashada iyo ballamaha labadaba.

www.oslo-universitetssykehus.no

rom for alle

Warqadan waxa loo abuuray iyadoo ah qeyb kamid ah shaqada ka hortagga Kaniisada City Mission ee la xiriirta caafimaadka galmada ee lala beegsanayo muhajiriinta 2017.